

Miisaaniyada 2024 iyo canshuurta guryaha ee Degmada Washington ku talisay ayaa taageeraysa bixinta adeegyada federaalka iyo kuwa gobalka ee waajibka ah, iyo sidoo kale shaqooyinka aasaasiga ah ee dawlada degmada. Miisaaniyada waxaa saamayn ku yeeshay kororka bulshada, dalabaadka adeegyada oo kordhay, iyo qarashaadka kacay ee badeecooyinka iyo adeegyada. Maalgelinta cusub ee gobalka ayaa la ansixiyay 2023 si loo baxsho adeegyada waajibka ah ee gobalka. Maalgelintaan cusub ayaa u ogolaatay gudiga degmada inay dhaqan geliyaan canshuurta cusub ee guryaha.

KORDHINTA CANSHUURTA GURYAHA EE 2024



↑ 3.95%

Degmada Washington ayaa leh canshuurta guryaha ee 4aad ee ugu hoosaysa calaa qof 87 degmo ee Minnesota.

HOOS U DHIGISTA QIIMAHA CANSHUURTA EE 2024

↓ 7.3%


Qiimaha canshuurta degmada Washington ayaa hoos u dhacay 7 kamid ah 8 sano ee lasoo dhaafay.



SAAMAYNTA CANSHUURTU KU LEEDAHAY MULKIILEYAASHA GURYAHA



Qiimaha celceliska ee guryaha Degmada Washington (\$417,000 ee Qiimaha 2024)




**1%
Koror ah
ka badan
2023**

*La qiyaasay

Canshuurta Guryaha Qoondada

22 senti oo lagu bixinaayo canshuurta guryaha ee Degmada Washington ayaa ku baxa dakhliga adeegyada degmada; cadadka soo hara ayaa loo diraa degmooyinka kale ee canshuurta.



Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan miisaaniyada degmada



co.washington.mn.us/budget

AAA Qiimaha Amaahda

Degmada Washington, ee Minnesota, waa mid kamid ah afarta degmo ee Minnesota iyo mid kamid ah 80 degmo ee wadanka oo dhan oo helay qiimaynta Sadexda A ee labadaba wakaaladaha S&P iyo qiimaynta Moody.

Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan canshuurahaaga guryaha



co.washington.mn.us/PropertyTax

Ka qaybgal kulanka dadwaynaha 2024 oo ku saabsan miisaaniyada degmada oo dhacaaya 6 p.m. Diseembar 7 kana dhacaaya Qolka Gudiga oo ku yaala Government Center, 14949 N. 62nd St. oo ku yaala Stillwater.

Maxay degmada Washington siisaa bulshada?



Maktabad

Maktabada waxaa loogu talo galay inay dhiiri geliso diihaalka, hal abuurka hogaaminta iyo ifinta fursada. Waxay arintaan ku samaysaa adeegyada lagu baxsho sideeda xarumood ee maktabada degmada, iyo sidoo kale khayraadka socda ee onlaynka ah.



Xafiiska Nabadgalyada

Saraakiisha xafiiska Nabadgalyada ayaa roondeeya wadooyinka degmada si ay u sugaan badqabka, ayna u sameeyaan baaritaannada danbiyada. Xafiiska ayaa sidoo kale maamula xabsiga degmada ee Xarunta Sharci Fulinta.



Public Works/Beeraha Raaxada

Public Works ayaa qorsheysa, dhista oo ilaalisa wadooyinka degmada, buundooyinka, iyo dhismeyaasha. Waaxdu waxay sidoo kale kormeertaa 10 beeraha raaxada iyo marinada dalxiiska ah ee degmada, ayna ku jirto Xarun Taariikheedka Maxkamada oo ku taalla Stillwater.



Adeegyada Bulshada

Adeegyada Bulshada ayaa iskaashi la samaysa wakaaladaha dawlada iyo kuwa gaarka loo leeyahay si ay uga caawiso shaqsiyaadka iyo qoysaska inay helaan nabadgalyo ayna guul gaaraan. Waxay bixisaa taxaneyaasha adeegyada, sida difaacada ilmaha, ku tiirsanaanta caawimaada kiimikada, adeegyada halayeyada, iyo adeegyada dhaqaalaha iyo shaqada.



Caafimaadka Dadwaynaha iyo Bii'ada

Caafimaadka Dadwaynaha iyo Bii'adu waxay bixisaa adeeygo si loo difaaco, kor loogu qaado, loona hormariyo caafimaadka iyo bii'ada bulshada. Waxay maamushaa Xarunta Bii'ada, waxayna maamushaa barnaamijyada caafimaadka si kor loogu qaado bulshooyin caafimaad qaba.



Diiwaannada Guryaha iyo Adeegyada Canshuur Bixiyaasha

Diiwaannada Guryaha iyo Adeegyada Canshuur Bixiyaasha ayaa bixisa adeegyada canshuuraha, qiimaynta, diiwaan bixinta, diiwaannada dhulka, ruqsad bixinta, iyo adeegyada doorashada dadka ku dhaqan Degmada Washington.



Sixitaannada Bulshada

Sixitaannada Bulshadu waxay siisaa cafin iyo danbi dhaaf labadaba dadka waawayn iyo carruurta danbiyada lagu helo ee degmada. Kormeerka ku saleysan bulshada waa farsamo waxtar leh oo guul looga gaari karo badqabka bulshada ayadoo la adeegsanaayo qaab dhaqaalaha ilaalinaaya.



Qareenka Degmada

Xafiiska Qareenka Degmada ayaa u sameeya baaritaanka danbiyada degmada, wuxuu talo madani ah siiyaa shaqada degmada, wuxuuna adeegyada kahortaga danbiyada u sameeyaan bulshada.



Waaxda Shaqaalaha

Waaxda Shaqaalaha ayaa ka caawisa dhammaan waaxaha soo jiidashada iyo joogtaynta shaqaale tayo leh. Waxay qortaa shaqaale si waafaqsan mabaadii'ada fursada shaqada waxayna tiir dhexaad u tahay xiriirada shaqaalaha, xiriirada shaqada, iyo maareynta khatarta.



Tignooloojiyada Xogta

Tignooloojiyada Xogta ayaa ku hagaysa Degmada Washington ayadoo adeegsanaysa adeegyada iyo farsamooyinka hufan, waxtarka leh, ee tayada sareeya ee xogta tignooloojiyada.



Xisaabaadka iyo Maaliyada


Xisaabaadka iyo Maaliyada ayaa maamusha khayraadka dhaqaalaha degmada iyo hawlaha si loo xaqiijiyo hufnaanta iyo isla xisaabtanka khayraadka bulshada, hawlaha ganacsiga oo wax ku ool ah oo hufan, iyo uruurinta saxda ah, kabista, iyo maaraynta hantida maaliyadeed.



Maamulka

Xafiiska Maamulka ayaa baxsha maamul fulinaaya go'aannada, xeerarka, axdiyada, iyo qaraarada Golaha Gudoomiyaasha, wuxuuna xog iyo tilmaan ka bixinayaa ka caawinta saraakiisha la doorto gaarista go'aanno muhiim ah hadda iyo mustaqbalka labadaba.

Sidee ayay degmadu u maal gelisaa qaybta canshuuraha guryaha?



- Dhismaha iyo Dayactirka Wadooyinka Waawayn **30%** 🌳
- Caafimaadka iyo Adeegga Dadwaynaha **22%** 🏥 🤝
- Badqabka Dadwaynaha **19%** ⭐ 🛡️ ⚖️
- Dawlada Guud **10%** 🏢 📊 🏠
- Maktabadaha iyo Dalxiiska **5%** 📖 🌳
- Bixinta Daymaha **4%** 📄
- Guryaha iyo Canshuurta **4%** 📄
- Tignooloojiyada Xogta **4%** 🖥️
- Hanaanka Kale ee Dakhliga **2%** 🌳